



Orientation to Ontario

XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA MACAAMIISHA

XUQUUQAHA IYO WAAJIBAADKA

Gudaha Ontario, qof kasta waa laga difaacayaa falalka ganacsiga ee cadaalad darada ah waxaana difaacaya Sharciga Difaaca Macaamiisha.

Xuquuqda Macaamiisha

- Kaalmooyinka iibku ma khiyaani karaan ama khaldi karaan macaamiisha.
- Heshiisyadu waa inay yihiin kuwo qeexan ayna fududdahay in la fahmo.
- Waxaa jirtada “mudada ka fakarka,” kadib marka la saxiixo heshiis—haddii aad badesho fikirkaaga inta lagu jiro mudadaan, waad baabi’in kartaa heshiiska.
- Haddii aad hesho badeecooyin aadan dalban, qasab maaha inaad aqbasho ama lacagtooda dhiibtay.
- Keenista alaabta iyo adeegyada waa in lagu sameeyaa waqtiga loo asteeyay.
- Haddii wax ka qaldan yahay alaabta ama adeegga, iibiyuhu waa inuu cilada saxaa muddo waqti macquul ah gudihiis.

Wajibaadka Macmiilka - marka aad tahay macmiil, waxaad masuul ka tahay samaynta waxyaabaha soo socda:

- Inaad baarto aadna isku eegto alaabta kahor intaadan iibsana.
- Inaad eegto tayada iyo fikradaha dadku ka dhiibteen adeeg bixiyaasha.
- Waa inaad raacdaa tilmaamaha alaabta aad iibsatay.

Xaqiiji inaad hesho wax kasta oo aad qarashkooda dhiibtay.

SAMEE BAARISTAADA

- Waa muhiim inaad baarto kahor intaadan wax iibsana ama aadan codsan adeeg.
- Dukaanno badan ayaa leh iibabka gaarka ah ama xiliga gaarka ah ku salaysan iyo adeegyada gaarka ah ee asbuuclaha ah. Marka aad wax oonleen ku iibsanayso, adeegso koodhadhka qiimo dhimista.
- Alaabaha dukaannada adeegga cuntada iyo alaabta guriga, waxaad isku eegi kartaa qiimeyaasha dukaannada kaladuwan waxaadna akhriin kartaa warbixinadooda asbuuclaha ah. Dukaannada qaar ayaa alaabta ku iibinaaya isla qiimaha dukaannada kale.
- Libabka qaalgiga ah, booqo webseedyada tafaariiqda, booqo dukaanka ama wac adeegga macaamiisha si aad u waydiiso su’aalo.
- Marka aad iibsanayso alaabo badan, akhri fikradaha ay dadka macaamiisha ah kaga dhiibteen oonlaynka, webseedyada iyo daabacaadaha kuwaasoo alaabaha u tijaabiya akhristeyaasha.
- Marka aad oonleenka wax ka iibsanayso, xaqiiji in qiimuhu uu ku qoran yahay Doolarka Canada.
- Marka aad alaab oonlayn uga dalbanayso shirkadaha Ameerikaanka, waxaa lagaa qaadi karaa qarashka dheeriga ah ee u qaadista alaabta wadamada shishieeye, canshuuraha Canada iyo canshuuraha xuduudaha.

Funded by / Financé par



1-855-626-0002

<https://orientationontario.ca>

HESHIISYADA

Adaa masuul ka ah inaad si taxadar leh u akhrido heshiisyada. Haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo akhrinta Ingiriisiga, codso waqti dheeri ah oo uu aad kusoo akhrido heshiiska.

Heshiiska u qaado gruiga oo soo celi si aad u saxiixdo maalin kale. Marka aad shaqaalaysiiso qof gurigaaga ka shaqaynaaya, codso heshiis. Qaar kamid ah heshiisyada ugu badan waxaa kamid ah:

- heshiiska kirada guryaha
- qorsheyaasha adeegga moobilka
- daymaha gaariga ama ganacsiga
- heshiisyada kirada gaariga ama taraaga
- xubnimada jiiimka
- heshiiska kaarka daynta
- xeerarka caymiska
- heshiisyada dayactirka guriga

GUDBINTA CABASHO

- Haddii aad dhib ku qabto badeeco ama adeeg, waxaad gudbin kartaa cabasho. Arintaan ayaa caawinaysa adiga iyo macaamiishaada mustaqbalka.
- Talaabada koowaad waa inaad wacdo shirkada, aad u sharaxdo dhibaataada aadna ka codsato inay xaliyaan. Waxaad u baahan kartaa inaad la hadasho maamulaha ama kormeeraha.
- Haddii aan cilada la xalin, waxaad qoraal u diri kartaa shirkada. Sharax dhibaataada adoo bixinaaya faahfaahin dheeraad ah, codso in la xaliyo (sida dayactir ama in lacagta lagu cesho) oo qeex waxa aad samayn doonto haddii aysan xalin cilada.
- Haddii aan shirkadu soo jawaabin, waxaad haysataa dookh aad ku samayso talaabadii aad sheegtay inaad qaadi doonto.
- Waxaad cabasho rasmi ah u gudbin kartaa Wasaarada Dawlada iyo Adeegyada Macaamiisha ee Ontario iyo Laanta Ganacsiga Wanaagsan (BBB).
- Haddii ciladu la xariirto lacag aad u badan ama hanti qaali ah, waxaad sidoo kale cabashada u gudbin kartaa Maxkamada Dacwadaha Yaryar.

ILAHA XOGTA

Ontario Ministry of Government and Consumer Services

www.ontario.ca/page/consumer-protection-ontario

Better Business Bureau (BBB)

www.bbb.org/en/ca

